

# NIDAAMKA DIIWAANGELINTA BUKAANKA EE

## Barnaamijka Xashiishada Caafimaadka ee Minnesota

### TALLAABADA KOOWAAD



1

**Bukaanku wuxuu sheegayaa xaaladdiisa caafimaad ee u qalma.**

Soo booqo [mn.gov/medicalcannabis](http://mn.gov/medicalcannabis) si aad u ogaato xaaladaha caafimaad ee u qalma.

### TALLAABADA LABAAD



2

**Bukaanku waxa uu raadsanayaa Dhakhtarka daryeelka caafimaadka oo xaqiijiya xaalada.**

Dhakhtarkaaga daryeelka caafimaadku waa in uu galo khadka internetka si uu u xaqiijiyo xaaladaada caafimaad.

Caawinaad helida dhakhtar/daryeel-bixiye caafimaad:

- Weydiiso kooxdaada caafimaadka ama kooxaha dadka u dooda ee kugu metelaya xaaladaada.
- Ka raadi internetka, oo ay ku jiraan websaydyada ay leeyihiin kuwa sameeya xashiishada caafimaadka ee Minnesota.

### TALLAABADA SADDEXAAD



3

**Bukaanka ayaa waxa uu buuxinayaa arjiga isdiiwaangelinta, waxa uuna ku bixiyaa caddaynta aqoonsiga oo uu ku bixinayaa kharashka 90 maalmood gudahood.**

Kharashka diiwaangelinta sannadlaha ah ee bukaanku waa \$200, taas oo laga dhigi karo \$50 haddii la keeno dukumeentiga gargaarka caafimaad (medical assistance) oo habboon.

### TALLAABADA AFARAAD



4

**Bukaanku wuxuu emailka ogolaanshaha ka helayaa Xafiiska Xashiishada Caafimaadka.**

Kahor intaadan tagin Xaruntaada Qabinta Xashiishada Caafimaadka:

- Qabso ballan.
- Buuxi Is-qiimaynta Bukaanka.

### TALLAABADA SHANAAD



5

**Bukaanka ama daryeel-bixiyaha ayaa dawada xashiishada ka soo qaada xarun kasta oo Qaybisa Xashiishada Caafimaadka ee Minnesota.**

Xarumaha Qaybiya Xashiishada Caafimaadku waxay ku yaalaan: Blaine, Bloomington, Burnsville, Eagan, Hermantown, Hibbing, Mankato, Minneapolis, Moorhead, Rochester, St. Cloud, St. Paul, Willmar iyo Woodbury.